Psykiatri

REGION

KUSOO DHAWOOW kooxda OP (Adeeg gaarsiinta Dadka Maskaxda kajiran)

VELKOMMEN til OP teamet – opsøgende psykiatrisk team
Sprogversion: Somalisk

Magaca:

Takhtarka mas’uulka ka ah daawaynta:

Daaweeyaha mas’uulka ka ah hab socodka daawaynta:

Xariirka aasaasiga ah:

Taleefoonka:

KUSOO DHAWOOW

OP waxay u taagantahay Kooxda Adeeg gaarsiinta Dadka Maskaxda kajiran. Midaan waa daawayn gaar ah oo fudud lasiiyana bukaan socodka ka mid ah dadka maskaxda kaqaba jiro khatar ah. Bukaanada lagu daaweeyo qaab bukaan socod ah looma ogolaado isbitaalka xiliga daawaynta. Bedelkeedii, waxay haystaan fursad loogu daaweeyo, tusaale ahaan, guryahooda.

Daawaynta waxay ka koobantahay daawo la isku geeyay, latallin, hoggaamin, wadashaqayn iyo caawimaad. Daawaynta waxaa loo kala qaadaa sida soo socota:

- daawaynta kelida ah iyo kula shaqaynta adiga ee ku dhisan baahidaada
- in gurigaaga laguugu daaweeyo, hadii ay tahay midaan mida aad rabtid
- daawayn mudadeedu-dheertahay
- diyaarin takhtar xariir midkaas oo masuul ka ah daaweyntaada
- hal, xariir aasaasi oo joogto ah diyaarintiisa
- dhamaynta xariirka – ay kujirto hadii lagu ogolaaday
- kala doorashada lashaqaynta qoyskaada iyo daryeelayaashaada, hadii aad midaan danaynaysid

Waxaan kaloo kugu caawin karnaa:

- tababarid xirfadahaaga, si aad sifiican awood ugu yeelato la qabsashada howlahaaga maalin laha ah
- joojinta kelinamadaada iyo in aad awood u yeelato in aad dadka kale ka ag dhowaato
- sii wadid daaweyntaada
- lahadlid dowlada hoose
- ka qayb qaadasho howlaha kadhacaya meesha aad kunooshahay

TAKHTARKAAGA XARIIRKA IYO XARIIRADA AASAASIGA AH

Takhtarkaaga xariirka iyo xariiro aasaasi ah oo laga diyaariyay kooxda OP ayaa habayn doona kadibna kuu qorshaynaya daawayntaada. Waxaad ka heli doontaa magaca takhtarkaaga xariirka iyo xariirada aasaasiga ah bilowga warqadaan.

QORSHAHA DAAWAYNTA

Qorshe daawayntaada kusaabsan ayaa lagula dejin doonaa marka aad la biloowdo kooxda OP. Takhtarka ayaa ogolaan doona qorshahaan, kadibna waxaa lagu siin doonaa nuqul kusaabsan qorshaha daawayntaada hadii aad mid rabtid.

OGOLAANSHO

Si daawayntaada loogu habeeyo qaabka ugu fiican ee suurta galka ah, waxaan u baahanahay in aynu is dhaafsano warbixin kusaabsan caafimaadkaada, tusaale ahaan, dowlada hoose. Midaana waxay u baahantahay adiga ogolaanshahaaga, kadibna anaga ayaa kaala hadli doona arintaan.

QOYSKA IYO DARYEELAYAASHA

Aadbaan ugu farxi lahayn in aynu lashaqayno qoyskaada iyo daryeelayaashaada. Midaana waxay noqon kartaa, tusaale ahaan, qoyskaada, saaxiib kuusoo dhow ama qofkale oo aad ku kalsoontahay.

Waxaan kaala hadli doonaa qofka aad jeceshahay in uu howsha daawayntaada ka qaybqaato.

DIIWAAN GALINTA BUKAANKAAGA

Inta lagu guda jiro xilliga daawayntaada aad la qaadanayso kooxda OP, waxaan jiradaada iyo daawayntaada ku sharxi doonaa diiwaan gelinta bukaankaaga. Waxaad haysataa kala doorasho ah in aad qaadato nuqulka diiwaankaaga hadii aad mid doonaysid.

Boggaan internetka ah www.sundhed.dk, waxaad ka geli kartaa nuqul elektaroonig ah oo kusaabsan diiwankaaga (e-joornaal). Midaana waxay u baahantahay saxiix lambaro leh ama NemID. Warbixinta kusugan diiwaanka elektarooniga ah waa mid la heli karo 14 maalmood kadib marka la geliyo.

MARKA AY DAAWAYNTU DHAMAATO

Marka ay mudada daawayntaadu dhamaato, waxaan tixgelin doonaa, dhamaanteena adiga kula tixgelin doonaa, hadii aad weli ama aadan u baahnayn daawayn soconaysa iyo inkale, tusaale ahaan dhamaan Xarumaha Caafimaadka Maskaxda Ee Bulshada. Xariirkaada aadbuu kuu caawinayaa inta mudadaan kala guurka ah lagu jiro, sidoo kale anagana waxaan wargelin doonaa GP kaaga.

Hadii aad rabtidna waxaad hadal kama dambays ah layeelan kartaa takhtarka katirsan kooxda OP.

WAAN DANEYNEYNAA IN AYNU MAQALNO WAXAAD KA FAKARAYSID

Waxaan jecelaan lahayn in aynu ogaano sida aad dareentay daawayntaada ay kudaaweeyeen kooxda OP. Fadlan lasoo xariir shaqaalaha hadii aad qabto fikrado wax horumarin kara, sidaas waxaan ku wanaajin karnaa waxa aynu bixino.

MA JECLAAN LAHEYD IN AAD OGAATID WAX DHEERAAD AH?

Macluumaad baddan oo kusaabsan Adeegyada Caafimaadka ee Maskaxda – Caasimada Gobolka ee Denmark waxaad ka heli kartaa bogga internetka:
www.psykiatri-regionh.dk

Salaanta ugu wanaagsan,
Gobolka Hovedstadens Psykiatri (Adeegyada Caafimaadka ee Maskaxda – Caasimada Gobolka ee Denmark)

ADEEGYADA CAAFIMAADKA EE MASKAXDA – CAASIMADA GOBOLKA EE DENMARK

Adeegyada Caafimaadka ee Maskaxda – Caasimada Gobolka ee Denmark waa isbitaalka ugu weyn denmark ee daryeelka caafimaadka maskaxda wuxuuna daaweeyaa ku dhowaad 41,000 bukaan sanad kasta jirooyinka sida isku dhaxyaac maskaxeedka, walwalka, niyadjabka. Daawaynta waxay ka dhici doontaa Xarumaha Caafimaadka ee Maskaxda iyo Xarumaha Caafimaadka Maskaxda ee Cunuga iyo Qaangaarga daawaynta cudurada maskaxda ee Adeegyada Caafimaadka Maskaxda – Caasimada Gobolka ee Denmark kuwaasoo ku yaala juquraafi ahaan kuna faafsan dhamaan Caasimada Gobolka. Daawaynta hoos timaada Adeega Caafimaadka ee Maskaxda – Caasimada Gobolka ee Denmark waxaa si aasaasi ah looga hellaa Xarumo Daawaynta Maskaxda ah iyo isbitaalo, soo booqashada kooxaha iyo, meeshii daruuri ah, u ogolaanashaha gallida bukaanka.

Gobolka Hovedstadens Psykiatri (Adeegyada Caafimaadka ee Maskaxda – Caasimada Gobolka ee Denmark)
Kristineberg 3
DK-2100 Copenhagen Ø, Denmark
Teleefoonka.: +45 4511 2000
www.psykiatri-regionh.dk

Habaynta sawirka: Rikke Bransner
Koncern Kommunikation, Grafik & TV
Sawir qaadaha: Phillip Drago Jørgensen
Janaayo 2012

Sawirada warqadan kujira waxay bukaanada iyo shaqaalaha tusayaan xaaladaha maalin laha ah ee Gobolka Hovedstadens Psykiatri (Adeegyada Caafimaadka ee Maskaxda – Caasimada Gobolka ee Denmark).